
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Wakhtigii Xumaa ee Ciise

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot, Sarah S.


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Markii Ciise la baabtiisay, Ilaah baa la hadlay oo yidhi, "Kani waa Wiilkaygii aan jeclaa. Isagu waan ku faraxsahay." Ruuxa Qudduuska ee Ilaah baa ku soo dul dagay sidii qooleey oo kale u eg.





Inyar dabadeed,
Ruuxii Qudduuska
Ilaah ayaa Ciise ku
hoggaamiyey meshii
cidlada ahayd.
Ciise waa keligii.

Afartan cisho ayuu soomay Ciise.
Oo la micne ah inuusan wax
habayaraatee cunta ah afka
saarin.  Aad buu u gaajooday.



Kitaabka Qudduuska ayaa sheegay in bahalo dugaagta duurka ay meeshaa jooogeen.



Shayddaankii baa u yimid si uu jarribo Ciise. Wakhtigii bilowgiina, wuxuu jarribay aadan iyo Xaawo iney Ilaah ku addeeci waayeen beerta Eden.




Shayddaankii xitaa wuxuu isku dayayaa inuu jarribo, Wilkii Ilaah, Ciise.

“Haddii aad ahaan lahayd Wiilka Ilaah,” oo Shayddaanka ku yidhaado. “Dhagaxan u bedel Kibis.” Wuuna ogaa inuu Ciise gaajoonayo. Wuuna ogaa inuu Wiilka Ilaah inuu dhagaxa u bedeli karo Roodhi. Miyuu Ciise ka yeelay Sheyddanka?




Maya! Ciise wuu ka diiday ma adeecin Shayddaankii. Labadaraadlaba wuxuu ugu jawaabay Ereyga Ilaah. “Dadku waa inaanu kibis oo keliya ku noolaan, laakiin inuu erey walba oo afka Ilaah ka soo baxo ku noolaado.”




Markaasaa Ibliiskii magaaladii quduuska ahayd ee Yerusaalim geeyey, macbudkii qudduuska ahaa oo ahayd meeshii dadka ku caabudi jireen Ilaah. Kolkaa ka dib muxuu sameeyey Shayddaankii?




“Haddaad tahay Wiilka Ilah, hoos isu tuur,” Ibliiskii baa sidaa ku yidhi. “Ereygiisa wuxuu leeyaahay wuu ku badbaadin doonaaaye.”

“Maya!” Ciise ayaa ugu jawaabay. “Wey qoran tahay...’ Rabbiga Ilaahaaga ah waa inaadan jarribin.”





Kol labaad buu isku dayaya Shayddaankii.
Wuxuu geeyey buur aad u dheer.

Wuxuuna tusay boqortooyooyinkii dunida oo dhan iyo ammaantoodii, wuxuuna ku yidhi, “Waxyaalahan oo dhan waan ku siin doonaa haddii aad ii sujuuddid oo i caabuddid.”



“Shayddaan yahow, bax!” ayuu ku amray Ciise. “Wey qoran tahay… ‘Waa inaad caabuddaa Rabbiga Ilaahaaga ah oo waa inaad Isaga keliya u adeegtaa.”



Ibliis ayaa ka tagay Ciise in muddo ah. Kadib waxaa dhacay arin cajiib ah. Ilaah wuxuu u soo diray malaa'igo si ay u raaxaystaan oo u daryeelaan Wiilkiisa Ciise - kaas oo aan addeecin Ibliiska.



# Wakhtigii Xumaa ee Ciise

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 4, Luukos 4

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130


Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16